# Hubinta Cuntada & Nafaqada

FSAU
Qaybta Falanqaynta Hubinta Cuntada ee Soomaaliya
Waxa la soo saaray
21ka Bisha 12aad , 2007

## Warbixinta - Fiirada Digniin Hore ee Xilliga Deyrta Kadib

Qiimaynta xilliga Deyrta 2007/08 kadib ee FSAU iyo hay'adaha ay isbahaystaan ay ka samaynayeen gobollada waqooyiga way dhammaatay, ta laga samaynayo gobollada koonfurta iyo kuwa dhexena way socotaa. Natiijooyinka qiimaynta iyo **Qoontaynta Xaaladaha ee hubinta cuntada oo ay la socoto saadaasha lixda bilood ee soosocda** waxa dib loola eegi doonaa hay'adaha toddobaadka u dambeeya bisha 1aad ee sannadkan 2008, muddo yar kadibna waa la soo saari doonaa.

Cimilada
Colaadda Sokeeye
Beeraha
Xoolaha
Suuqyada
Nafaqada

### Arrimaha muhimka ah iyo Digniinta hore ee bisha 1aad illaa bisha 6aad ee sannadka 2008

- **Baahida bina-aadamnimada ee dadka cusub ee soo barakacay iyo bulshooyinka ay martida u yihiin, gaar ahaan gobollada Shabeellooyinka iyo kuwa dhexe:** xiisadda iyo xasillooni la'aanta socota siina kordhaysa ee ka jirta Muqdisho iyo goobaha ku hareeraysani waxay keentay in dad kale ay barakaceen bishii la soo dhaafay. Hadda **qiyaasta ugu wanaagsan ee laga bixinayo dadka ka soo barakacay Muqdisho taniyo bishii Labaad ee sannadka 2007 waxa weeye 670,000 oo qof.** Barkaca 70,000 oo qof oo kale oo soo qaxay labadii toddobaad ee u dambeeyey, waxay keeni doontaa in **xaaladda bina-aadamnimada ee goobo badani ay sii xumaato**, siiba gobollada Shabeellooyinka iyo kuwa dhexe oo ay bulshooyinka martida loo yahay horeba u haysteen dibaatooyin adagi (bogga 3).


- **Qiimaha cuntada oo jooga heerkii ugu sarreyey wuxuu halis ku hayaa fursad-u-helidda cuntada ee dadka dhulka miyiga ah deggan ee saboolka ah, dadka barakacay iyo dadka deggan magaalooyinka.** Qiimaha galayda iyo habdhuudhka/mesaggada gudaha dalka laga soo saaro, iyo weliba qiimaha dalagga dibeddda laga keeno (daqiiqda iyo bariiska) wuu kordhayay 12kii bilood ee la soo dhaafay, iyadoo uu qiimuhu aad u kacay lixdii bilood ee u dambeeyey iminkana uu joogo heerarkii ugu sarreeyey ee la diiwaan geliyey dhowr suuq. Koonfurta Soomaaliya, qiimaha gallayda iyo hadhuudhku wuxuu kordhay 100 illaa 150% taniyo bishii 1aad ee 2007. Qiimaha bariiska ee gobollada dhexe iyo waqooyi-bari wuxuu jooogaa heerkii ugu sarreeyey weligiis, isagoo labanlaabmay taniyo bishii 1aad ee 2007. Heerka iyo baaxadda qiime-korodhka dalaggu waxa weeye mid aan caadi ahayn oo muhiim ah - waana mid halis weyn ku ah hubinta cuntada ee qoyska, maddaama suuq ka iibsiga dalaggu uu yahay habka ugu weyn ee ay cuntada ku helaan badi dadka dhulka miyiga ah deggan ee saboolka ah iyo dhammaan dadka deggan magaalooyinku. Dadka halsita gaarka ah ku jiraa waa kuwa ku nool goobaha rajada laga qabo soosaarka dalagga Deyrtu uu liito, sida gobolka Hiiraan iyo qaar ka mid ah goobaha beeruhu ay ku baxaan roobabka ee Shabeellooyinka, maddaama soosaarka hooseeya macanihiisu ay noqon doonto in sidii hore si ka sarraysa loogu tiirsanaan doono in suuqa laga soo iibsado, iyo goobaha ay colaadda sokeeyuhu ku waddo inay sii kordhayso oo ay qasayso howlaha dhaqaalaha iyo ganacsiga maaddama fursadaha dakhligu ay koobnaan doonaan. Qiyaasta ah 670,000 ee qof ee sida cusub uga soo barakacay Muqdisho iyo bulshooyinka ay martida u yihiin ee taageeraya dadkaas soo barakacay, qiimaha cuntada ee kordhay saamayn weyn ayuu ku yeelan doonaa fursad-u-heliddooda cuntada, taasoo halis ku haysa inay sii xumaato xaaladdooda bina-aadamnimada ee ka sii daraysaa (bogga 4 iyo 8).

- **Gurmadka Bina-aadamnimada (GB) iyo Xiisadda Cuntada & Hab-nololeedka ee Aad u Xun (XCHAX) ee sii socda ee ka jira gobolka Hiiraan way ka sii darayaan** taasoo ay u sabab yihiin arrimaha isbiirsaday ee ay ka midka yihiin abuuritaanka midhaha/firrida ee Deyrtii oo liitay, xaaladaha seeraha oo sii xumaanaya kadib roobabkii Deyrta ee aan fiicnayn, qiimaha dalagga gudaha iyo ka dibedda laga keeno oo heer sare gaadhay si degdeg ahna u sii kordhaya (qiimaha hadhuudhku wuxuu kordhay 145% lixdii bilood ee la soo dhaafay, oo wuxuu joogaa halkii ugu sarrayaysay dhammaan koonfurta Soomaaliya), iyo xiisadda iyo colaadda sokeeye ee sii kordhaya oo keenaya xaalad sii xumaanaysa (bogga 3).

- **Heerarka digniinta hore iyo Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun ayaa sii kordhay gobollada dhexe**, maddaama xaaladaha khayraadka daaqa iyo biyuhu ay ku wadaan inay ka sii darayaan. Badi barkadaha iyo biya galeennada dabiiciga ahi aad ayay u hooseeyaan goobaha qaarna horeba way u madheen. Iyadoo ay koobanyihiin fursada guuritaanku, badi xoola-dhaqatadu waxay ku tiirsanaan doonaan biya dhaamis xilliga dheer ee Jiilaalka. Qiimaha dalagga oo aad u kordhay oo taagaan heerkii ugu sarreeyey ee la diiwaan geliyey (bariiska iyo hadhuudhka/masaggeda), iyo barakaca, xiisadaha iyo colaadda sokeeye ee ka dhacaya Muqdisho oo sii kordhaya (bogga 7 & 11).

- **Guud ahaan abuuritaanka midhaha/firrida ee koonfurta waxa loo arkaa inuu yahay caadi gobollada Jubbooyinka, Baay, Gedo iyo Shabeellooyinka**, waxa ka reeebban xeebaha gobollada Shabeellooyinka ee beeruhu ay ku baxaan roobabka (bogga 4).

Cinwaanka:
FSAU - Somalia
Kalson Towers,
Parklands
Box 1230 Village Market
Nairobi, Kenya
Tilifoonka:
+254 20 374 5734
Faakiska:
+254 20 3740598
Iimayka:
fsauinfo@fsau.or.ke
www.fsausomali.org





Wakhtiyada Xilliada Soomaaliya iyo Dhacadooyin Muhiim ah


cimilada

# Arrimaha Ugu Muhiimsan Qaybaha


**Khariidadda 1: Isku-darka Roobabka ee Bilaha 10aad, 11aad & horraanta bBisha 12aad ee '07**




**Khariidadda 2: Isku-darka Roobabka oo ah % oo ka duwan Celceliska Muddada Dheer ee Bilaha 10aad, 11aad & horraanta bisha 12aad ee '07**




**Khariidadda 3: Tilmaamha Isbeddellada Cagaarka dhulka ee Horraantii Bisha 12aad ee '07**




## CIMILADA

Roobabka Deyrta (Bisha 10aad-bisha 12aad) waxa weeye kuwa labaad ee ugu muhiimsan koonfurta Soomaaliya, waxana ay wax ka taraan qiyaasti boqolkiiba 40 soosaarka dalagga ee sannadkii, roobabka Guga ayaa ah kuwa ugu muhiimsan ee wax ka tara boqolkiiba 60. Sida ay u da'een roobabka Derytu waxa kale oo ay muhiim u yihiin seeraha maddaama uu daba socdo xilliga Jiilaalka ee dheeri. Roobabkii Deyrta '07 waxay ka billaabmeen badi gobollada tobankii bishii 10aad, taasoo muujinaysa inay xillogoodii ku da'een. Guud ahaan sida ay u da'een roobabku marka la eego xooggooda, fiditaankooda iyo sinnantoodu way kala duwanayd. Inta badan ee gobollada beeraha ee koonfurtu waxay heleen roobab wanaagsan, iyadoo gobollada dhexe, qaybo ka mid ah gobollada waqooyi-bari iyo goobo ka tirsan koonfurta ay ka da'een roobab ka yar 50 mm (Khariidadda 1).

Goobaha roobabka ka da'ay ay liiteen waxa ka mid ah qaybaha waqooyiga ee Bakool, xeebaha gobollada Shabeellooyinka iyo gobollada dhexe, gobolka Hiiraan, qaybo ka mid ah Galgaduud iyo Mudug, bariga gobollada Nugaal (degmooyinka Garoowe iyo Taleex), iyo qaybta galbeed ee Sool-Sanaag ee waqooyi-bari. Goobahaas, roobabku way ka hooseeyeen caadi marka la eego inta ay la'eegaayeen iyo fiditaankooda labadaba. Waxa ka reebban goobo ka tirsan Galgaduud, badi dhulka seeraha ee gobollada dhexe ee Hiiraan illaa Gaalkacayo, isku darka roobabka ka da'ay waxay u dhexeeyeen 0 iyo 50mm. Marka la barbar dhigo celceliska muddada dheer, badi goobahaasi waxay heleen roobab ka yar boqolkiiba 60 sida caadiga ah bishii 10aad illaa tobankii maalmood ee u hooreeyey bishii 12aad (Khariidadda 2). Wadarta roobabka ka da'ay goobahaasi kumay fillayn inay dib u buuxiyaan biya-galeennada, dib-u-soo-cusboonaysiiyaan daaqa iyo inay hore u mariyaan midhaha/firida ku baxa roobabka. Sida ay roobabku ugu koobnaayeen goobaha qaar, waxa kale oo ay keentay guuritaan xoolaha ah oo aan caadi ahayn, kaasoo culays saaraya kayraadka seeraha iyo biyaha ee kooban. Helitaanka biyuhu iminka wuu ka hoosaysaa caadi, badi berkaduhu way madhanyihiin ama biyo yar ayaa ku jiraa.

Badi gobollada beeraha ee koonfurta, sawirka dayax-gacmeedku wuxuu muujinaya warbixinaha guduhuna ay xaqiijinayaan in roobabku ay ahaayeen caadi ama ay ka sarreeyeen. Xogta ka soo baxday shabakadda qiyaasta roobabku waxay iyana muujinaysaa in sida ay roobabku uga da'een badi koonfurtu ay u badnayd caadi. Gobollada Jubbooyinku waxay heeleen roobab ka badan boqolkiiba 300 sida caadiga u ah 1dii bishii 10aad illaa 10kii bisha 12aad ee 2007, iyadoo badi gobolka Baay, gobolka Gedo iyo qaybo ka mid ah gobollada Shebeellooyinku ay heleen roobab ah boqolkiiba 80 ñ 120 sida caadiga ah (Khareiidadda 2). Gobollada Shabeellooyinka, roobabka Deyrtu waxay ku billaabmeen wakhtigoodii, hase yeeshee way kala duwanayd xoogodda, muddada ay da'ayeen iyo dhulka ay gaadheen intuba. Goobaha roobab ku filani ay ka da'een waxa ka mid ah Wanla Weyn, Qoryoolay, Kurtunwaarey iyo qaybo ka mid ah Afgooye, iyadoo Aadan Yabaal, xeebaha Marka, Kurtunwaaray iyo Baraawe roobabka ka day'ay ay yaraayeen ama aanay helinba roobab.

Tilmaamha isbeddellada cabirka cagaarka dhulka ee lagu qaaday sawirka dayax-garmeedka, oo la barbar dhigayo ceceliska muddada dheeri wuxuu muujinayaa in heerarka cagaarka dhulka ee haddu marka la eego xilligan ay aad uga sarreeyaan caadi koonfurta Soomaaliya iyo qaybo ka mid ah waqooyiga, taasoo ka tarjumaysa in roobabkii Deyrta iyo roobabkii Guga/Karanta ay ahaayeen caadi (Khariidadda 3). Waxa ka reebban qaybo ka mid ah gobollada dhexe iyo dhulka xeebaha ee gobollada Shabeellooyinka oo tilmaamaha isbeddellada cabirka cagaarku dhulku uu hooseeyo roobabkii Deyrta oo liitay dartood. Warbixinaha guduhu waxay taageerayaan oo ay xaqiijinayaan xogta sawirka dayax-gacmeedka.

## COLAADDA SOKEEYO IYO DADKA KA BARAKACAY

Muqdisho waxay ku waddaa inay ka jirto colaad, xiisad aad u sarraysa iyo xasillooni-la'aan. Warbixinuhu waxay tilmaamayaan in dadka magaaladaas weli joogaa ay ku nool yihiin xaalad argagax leh iyo inay si joogta ah halis uga jiraan in dhibaato loo gaysto. Degmooyin badan oo magaaladaas ah waa laga qaxay iyadoo ay dadku ka tegeen hantidoodii, guryahoodii, iyo ganacsigoodii oo u dayacan in la bililiqaysto ama la burburiyo. Colaadda sokeeye iyo xiisadda sii socota siina kordhaysa waxay ku wadi doontaa inay xaddiddo howlaha ganacsiga iyo dhaqaalaha, iyo weliba inay koobto dhaqdhaqaaqa dekedda iyo suuqyada gudaha iyo dibedda magaalada Muqdisho, taasoo hubinaysa inuu sii socdo qiimaha sare ee badeecadda lagama maarmaanka ah iyo inay yaraadaan fursadaha helidda dakhligu.

Heerarka xiisadda iyo xasillooni la'aanta sii socda siina kordhaya ee gudaha Muqdisho iyo goobaha ku hareeraysani waxay keeneen in tiro kale oo dadweynaha ahi ay barkaceen bishii la soo dhaafay. Qiyaasta ugu fiican ee hadda ee ku saabsan tirada dadka ka baxay Muqdisho taniyo bishii 2aad ee sannadka 2007 waa 670,000 (waxay laga soo qaatay: Qaybta Ilaalinta, 14kii bisha 12aad, 2007). Goobaha ay badi dadkaas dhowaan barakacay u qaxeen waxa weeye gobollada Shabeellooyinka iyo kuwa dhexe, iyo weliba gobolka Hiiraan. Qiyaasaha heerka gobolka ee dadka barakacay waxa weeye sidan: gobollada Shabeellada Hoose iyo Dhexe waxa u qaxay 295,000 oo qof taasoo ka dhigan 45% dadka barakacay, Mudug iyo Galgaduud waxa u qaxay 173,000 ama 26%, Hiiraan 47,000 ama 8%, Baay 37,000 ama 6%, inta hadhayna waxa u barakaceen Jubbooyinka, Bakool, Gedo, waqooyi-bari iyo waqooyi-galbeed (Sanduuqa 1)

**Sanduuq 1: Qiyaasta Dadka Barakacay**

| Gobolka | Qiyaasta Dadweynaha (UNDP 2005) | Qiyaasta # Dadka Barakacay illa hadda | % wadarta (qiyaasta) Dadka Barakacay oo heer gobol ah | % Wadarta Dadweynaha oo Heer Gobol ah | % Wadarta Dadweynaha Magaalooyinka oo Heer Gobol |
|---|---|---|---|---|---|
| Awdal | 305,455 | 10 | 0 | 0.0 | 0.0 |
| Woqooyi Galbeed | 700,345 | 10,000 | 1 | 1.4 | 2.0 |
| Togdheer | 402,295 | 710 | 0 | 0.2 | 0.6 |
| Sanaag | 270,367 | 760 | 0 | 0.3 | 1.4 |
| Sool | 150,277 | 4,400 | 1 | 2.9 | 11.2 |
| Bari | 367,638 | 3,800 | 1 | 1.0 | 2.1 |
| Mudug | 350,099 | 52,050 | 8 | 14.9 | 55.1 |
| Galgaduud | 330,057 | 120,700 | 18 | 36.6 | 204.7 |
| Hiraan | 329,811 | 47,600 | 7 | 14.4 | 68.9 |
| Bakool | 310,627 | 1,980 | 0 | 0.6 | 3.2 |
| Baay | 620,562 | 37,750 | 6 | 6.1 | 29.8 |
| Shabeellada Dhexe | 514,901 | 56,930 | 9 | 11.1 | 59.4 |
| Banaadir | 901,183 | 64,000 | 10 | 7.1 | 7.1 |
| Shabeellada Hoose | 850,651 | 238,200 | 36 | 28.0 | 137.9 |
| Gedo | 328,378 | 10,270 | 2 | 3.1 | 12.6 |
| Jubbada Dhexe & Hoose | 624,667 | 20,250 | 3 | 3.2 | 11.3 |
| | | | | | |
| WADARTA | 7,357,313 | 669,410 | 100.00 | 9.1 | |

Waxa laga soo qaatay: Qiyaasaha Dadweynaha:- UNDP Soomaaliya 2005, Tirada dadka barkacay iyo/ama laabtay: Kooxda Ilaalinta ee IASU Soomaaliya; 14ka Bisha 12aad ee 2007
Tixraac: Qiyaasta # dadka barkacay illaa hadda oo la soo koobay ujeeddooyin qorshaynta ah dartood.


Barakaca dhowaan ee 70,000 oo qof oo kale oo qaxay labadii toddobaad ee u dambeeyey waxay keeni doontaa inay sii xumaato xaaladda bina-aadamnimada ee ka jirtay goobo badani. Saamaynta waxa laga dareemi doonaa gaar ahaan xarumaha dadka barakacay ee sida Afgooye, Marka iyo Jowhar ee gobollada Shabeellooyinka iyo gobollada dhexe ee bulshooyinka la martiyey horeba uu culays u saarraa oo ay soo food saartay biya yaraani. Dadka ka qaxaya dagaallada Muqdishu waxay ka tegeen hab-nololeedyadoodii iyo hantidoodii hab-nololeedka. Joogitaanka dadka barakacay wuxuu culays sii kordhaya ku hayaa bulshooyinka ay martida u yihiin, taasoo cadaadis dheeraad ah saaraysa adeegyada biyaha iyo caafimaadka, sii kordhinaysa baahida loo qabo guryo kiro ah iyo tartanka loogu jiro fursadaha shaqada ee jira. Waxa intaas dheer dadka barakacay iyo bulshooyinka ay martida u yihiin waxa soo waajahay in qiimaha cuntada iyo badeecadda kale uu halkii ugu sarreeyey ee la diiwaangeliyey gaadhay (Jaantus 1 iyo 9). Baadhitaan Saamaynta Dadka Barakacay ku saabsan ayay FSAU iyo hay'adaha ay isbahaystaan samaynayaan kaasoo qayb ka ah Qiimaynta Dayrta 2007 Kadib.

Jid-goyn aan rasmi ahay oo waddooyinka lagu sameeyey ayaa dhaqdhaqaaqa ka dhigaya mid sidii hore ka adag, ka halis badan, kana kharash badan taasoo saamaynaysa dadka gudaha iyo hay'adaha isku dayaya inay bixiyaan gargaar. Hay'ad aan dawli ahayni waxay sheegtay inay bixiso $1600 oo ah 'cashuurta waddooyinka' K-50 iyo Muqdisho inta u dhaxaysa kharashka dhaqaajinta baabuurka ka qaada cunto dekedda Muqdisho ee geeya magaalada Afgooyena wuxuu ku dhowyahay $500. Khiyaamada iyo dhibaatooyinka noocan ahina waxay sii mija-xaabin doonaan awoodda hawlgalka ee hay'adaha Jimciyadda Quruumaha ka Dhaxaysa iyo kuwa aan dawliga ahayn taasoo keenaysa inay ka sii darto hubin-la'aanta cimilada hawlgalka ee horeba u adkayd.

Xaaladda nabad la'aantu weli way adagtahay goobo kale oo koonfurta Soomaaliya ah, iyadoo shilal nabad la'aanta la xidhiidha laga soo sheegay Wanla Weyn (Shabeellada Hoose), Beled Weyne (Hiiraan), Kismaayo (Jubbada Hoose), Jowhar (Shabeellada Dhexe), Waajid (Bakool), Cadaado (Galgaduud) iyo Baydhaba (Baay) (Khariidadda 4). Dhacdooyinkaasi waxay ku wadaan inay sii kordhinayaan xiisadaha isla markaana koobayaan dhaqdhaqaaqa dadka iyo badeecadda. Xiisaduhu waxa kale oo ay sii kordheen gobollada Hiiraan iyo dhexe. Roob la'aanta ka dhacday qaybo badan oo gobollada dhexe ah iyo tartanka sii kordhaya ee loogu jiro daaqa iyo gaar ahaan biyuhu waxay ku wadi doonaan inay sii kordhiyaan xiisadaha illaa ay ka da'ayaan roobabka Guga ee bisha 4aad ee sannadka 2008, taasoo sii kordhin doonta colaadda ku salaysan khayraadka dabiiciga ah, isla markaana koobi doonta dhaqdhaqaaqa baabuurta iyo xoolaha ee goobahaas.

Gobolka Sool qiyaastii 60-70% dadkii degganaa magaalada Laas Caanood (UNDP 2005: tirada dadweynuhu waxay ahayd 24,000) waxay qaxeen badhtamihii bishii 9aad ee 2007 kadib xasillooni la'aan siyaaseed, oo la sheegay inay ku geeriyoodeen 30-40 qof. Badi dadka barakacay waxay u qaxeen goobaha iyo tuulooyinka ku dhow, oo ay ku biireen xigtadoodii iyo asxaabtoodii. Shir dib-u-heshiisiin ah ayaa dhammaaday 23kii bishii 11aad, inkastoo ay xoogaa xasillooni ahi ka jirto goobtaas, haddana go'aan weyn lama gaadhin. Dadka barakacay way ka warwareegayaan Inay ku laabtaan Laas Caanood Illaa laga samaynayo dib-u-heshiisiin.

**Khariidadda 4: Natiijooyinka Colaadda Sokeeye: Bisha 11aad/12aad ee '07**



## BEERAHA

### *Abuuritaanka Midhaha/firrida iyo Soosaarka Dalagga*

Guud ahaan, abuuritaanka midhaha ee koonfurta waxa loo arkaa inuu yahay caadi gobollada Jubbooyinka, Baay, Bakool, Gedo iyo Shabeellooyinka, marka laga reebo xeebaha gobollada Shabeellooyinka oo la sheegay in abuuritaanka midhuhu uu aad u liito. Abuuritaanka iyo koritaanka midhaha/firrida ee dhulka webiyada ee gobollada Jubbooyinka iyo Shabeellooyinku waxa la sheegay inuu yahay caadi. Gobollada Jubbooyinka, dhulkii ay daadadku ku soo rogmadeen xilli roobaadkii hore iminka waxa lagu beeray midhaha xilliga caadiga ah ka baxsan oo ay ku jiraan sisin, digir iyo gallay si fiican ayaanay u abuurmeen. Maaddaama midhahaas si tartiib loo beerayo, waxa jiri doonaa fursado shaqo oo socon doono bilaha soo socda sida jaridda dhirta aan loo baahanyn iyo goynta midhaha. Badi dhulka beeruhu ay roobabka ku baxaan ee koonfurta Soomaaliya oo uu ku jiro gobolka Baay, abuuritaanka midhuhu wuu wanaagsanyahay sababtoo ah waxa ka da'ay roobab caadi ah ama ka sarreeya. Waxa ka reebban dhulka ay ka da'een roobab caadi ka hooseeyaa oo ay ku jiraan xeebaha gobollada Shabeellada Hoose iyo Dhexe, waqooyiga gobolka Hiiraan (Buulo Burti iyo Beled Weyne). Goobaha beer falidda u isticmaala cagafcagafta, dhulka midhaha lagu beeray waxa la filayaa inuu ka yaraan doonoo intuu ahaa sannadihii hore qiimaha shiidaalka iyo kirada cagafcagafyada oo sarreeya dartood. Cayayaanka gala midhuhuna waxa weeye dhibaato sii socota.

Dhulka digirta lagu beero ee Shabeellada Dhexe iyo koonfurta Galgaduud, roobab ku dhow caadi oo ka da'ay bishii 10aad waxay keeneen in midhuhu ay si fiican u ubaxaysteen, hase yeeshee, bishii 11aad muddo dheer oo uu dhulku qallaallaa ayaa keentay in qayb ahaan midhaha aan lagu guulaysan. Waqooyi-galbeed, soosaarka midhahaha ee dhulka beeraha ee gobollada Awdal iyo Galbeed waxa weeye kii labaad ee ugu sarreeyey muddo toban sano ah, kadib roobaabkii Guga/Karanta ee caadiga ka sarreeyey. Wadarta soosaarka dalagga waxa lagu qiyaasay 26,744 MT (22,722 MT hadhuudhka iyo 4,022 MT gallayda), taasoo ka dhigan 107% soosaarkii dalagga ee Gugii/Karantii sannadkii 2006.

### *Qiimaha Dalagga iyo Iswaydaarsiga Ganacsiga*


**Koonfurta Soomaaliya:** Qiimaha gallayda iyo hadhuudhka/mesaggada gudaha lagasoo saaro iyo qiimaha badeecadda dibedda laga keeno (daqiiqda iyo bariiska) ee koonfurta Soomaaliya way sii kordhayeen 12kii bilood ee la soo dhaafay, iyadoo uu qiimuhu aad u kacay lixdii bilood ee u dambeeyey Iminka uu gaadhay heerarkii u sarreeyey ee la diiwaangeliyo dhowr suuq.

Sida weyn ee uu u kordhay qiimaha dalaga gudaha laga soo saaro waxa keenay saadka dalagga oo kooban kadib soosaarkii dalagga ee ugu hooseeyey muddo toban sano ah (soosaarkii Gugii '07 wuxuu ahaa 31% Celceliska Dagaalka Kadib "CDK"1995-2006), kaasoo uu weheliyo in baahida loo qabo dalagga guduhu ay korodhay qiimaha dalagga dibedda laga keeno oo aad u kacay dartiis. Qiimaha dalagga dibedda laga keeno ee kordhay waxa keenay qiima-dhaca Shilinka Soomaaliya marka loo eego Doolarka Maraykanka (isagoo qiima dhacay 35-40% taniyo bishii 1aad ee 2007), taasoo qaali ka sii dhigaysa badeecadda dibedda laga keeno, isla markaana ay weheliso inuu hoos u dhacay saadka dalagga guduhu qaska ku yimi dhaqdhaqaaqa ama socodka ganacsiga ee ay colaaddu keentay dartiis.


Qiimaha gallayda iyo hadhuudhka ee dhammaan koonfurta Soomaaliya wuxuu kacay100 illaa 150% taniyo bishii 1aad ee 2007 iminkana 30% illaa 100% ayuu sarreeyaa marka la barbar dhigo celceliskooda heerarka qiimaha ee muddo 5 sano ah (Jaantus 2 iyo 3). Qiime korodhka weyn ee dalagga gudaha laga soo saaro waxa lagu arkay dhammaan suuqyada waaweyn ee gobollada Gedo, Baay, Bakool, Juba, Shabeellooyinka, iyo Hiiraan. Sidoo kale, isla suuqyadaas qiimaha dalagga dibedda laga keeno (bariiska iyo daqiiqda), oo caadi ahaan saddex illaa shan laab ka qaalisan dalagga gudaha, wuxuu kordhay 85% illaa 120% 12kii billood ee u dambeeyey.

Qiime korodhka ugu badan ee dalagga guduhu wuxuu ka dhacay gobolka Hiiraan, oo uu qiimuhu kacay 145% lixdii bilood ee u dambeeyey (taniyo bishii 5aad ee 2007), waxana weeye ka ugu sarreeya dhammaan koonfurta Soomaaliya. Iminka qiimaha gallayda iyo hadhuudhkuba way ka badanyihiin labanlaab celceliska qiimaha 5ta sano ee xilligan sannadka (iminka gallaydu waa 5,200 ShSo/kg, hadhuudhkuna waa 5,640 ShSo/kg) (Jaantus 3). Gobollada Shabeellooyinka waxa ka dhacay qiime korodhka labaad ee ugu sarreeya ee dalagga gudaha laga soo saaro, qiimaha gallayda ee hadduna (3,529 ShSo/kg) wuu labanlaabmay taniyo bishii 1aad ee 2007, iminkana 88% ayuu korreeya marka loo eego celceliska qiimaha ee 5ta sano (ShSo1,876) (Jaantus 2). Qiimaha hadhuudhka ee gobollada Shabeellooyinku wuu labanlaabmay sannakdii la soo dhaafay, iminkana wuxuu joogaa heerkii ugu sarreeyey taniyo muddada dagaalka kadib, iminkana 50% ayuu sarreeya marka la barbar dhigo celceliska qiimaha ee 5ta sanno (SoSh 2,196). Gobollada Jubbooyinka iyo Gedo, qiimaha gallaydu iminka 50% ayuu sarreeyaa marka loo eego celceliska qiimaha ee 5ta sano. Qiimaha hadhuudhka ee gobolka Bakool 25% ayuu korreeya marka loo eego celceliska qiimaha ee 5ta sano, gobolka Baayna 41% ayuu sarreeya marka la barbar dhigo ceceliska qiimaha ee 5ta sano. Qiimaha badeecadda dibedda laga keeno ee koonfurta Soomaaliya isna aad ayuu u kacay, taasoo keenaysa inay sii korodho baahida loo qabo dalagga guduhu. Qiimaha bariiska ee dhammaan suuqyada waaweyn ee koonfurta oo uu ku jiro gobolka Hiiraan, wuxuu kordhay 85 illaa 120% taniyo bishii 1aad ee sannadkan, iminkana wuxuu marayaa heerarkii ugu sarreeyey weligii , isagoo u dhexeeya 13,500 (13000

**Jaantus 1: Isbeddellada Qiimaha Dalagga oo Heer Gobol ah (ShSo)**




**Jaantus 2: Isbeddellada Qiimaha Gallayda ee Shabeellooyinka**



Beled Weyne) illaa 16,600 ShSo/kg. Qiimaha daqiiqdu isna aad ayuu u kordhay oo wuxuu gaadhay heerarkii u sarreeyey suuqyada Koonfurta (ShSo 11,300 illaa 15,750).

Gobollada dhexe iyo waqooyiga waxa iyana soo food saartay in qiimaha bariisku uu aad u kordhay oo uu gaadhay heerkii ugu sarreeyey ee la diiwaangeliyey, isagoo ah cuntada ugu muhiimsan ee laga istcimaalo gobolladaas (Jaantus 4 iyo qaybta Suuqyada), taasoo keenaysa inay korodhay baahida loo qabo dalagga guduhu. Gobollada dhexe waxa soo food saaray heerarka qiime korodka ee ugu badan uguna sarreeya tariikhda dhow. Qiimaha bariiska ee gobolkaasi wuu labanlaabmay taniyo bishii 1aad ee 2007, iminkana wuxuu joogaa heerarkii ugu sarreeyey ee la diiwaangeliyey kaasoo ah 15,000 ShSo/kg. Qiime korodhka ugu badan ee bariisku wuxuu dhacay lixdii bilood ee u dambeeyey, iyadoo qiimaha bariisku uu kacay 80% taniyo bishii 5aad ee 2007.


Waqooyiga-bari, qiimaha bariisku wuu labanlaabmay taniyo bishii 1aad ee 2007, haddana heerarka qiimaha bariiska ee gobolladaasi wuxuu joogaa heerkii ugu sarreeyey weligiis 12,900 ShSo/kg. Qiimaha bariiska ee gobollada waqooyi-galbeed wuu kordhay taniyo bishii 1aad ee 2007, laakiin qiime korodhkaasi waa 23%, sidaas darteed heerarka qiime korodhku way hooseeyaan marka loo eego gobollada kale. Weli warbixinaha guduhu waxay muujinayaan in baahida loo qabo dalagga gudaha ee gobollada waqooyi-galbeed (soosaarka hadhuudhka ee Guga/Karanta way ka sarraysaa caadi, eeg qaybta Beeraha) iyana way korodhay kadib qiime korodhka bariiska.

Heerka qiime korodhka dalagga iyo halka ugu sarreeya ee uu gaadhay ee la diiwaangeliyey waa dhacdo ay yartahay in la arko oo weyn ñ waana mid halis weyn ku ah hubinta cuntada ee qoyska, maaddaama iibka suuqyada ee dalaggu uu yahay qaabka ugu weyn ee ay cuntada ku helaan badi dadka saboolka ah ee dhulka miyiga ah deggan iyo dhammaan dadka deggan magaalooyinku. Goobaha rajada laga qabo soosaarka dalagga Deyrtu uu liito ee sida Hiiraan iyo qaar ka mid ah dhulka beeraha ee roobabka ku baxa ee Shabeellooyinka, soosaar hooseeya macanihiisu waxay noqon doontaa in sidii hore si ka badan loogu tiirsanaado iibka suuqyada xilli qiimaha dalaggu uu cirka marayo.


Sidoo kale goobaha colaadda sokeeye ee ku waddo inay sii kordhayso oo ay qasayso howlaha dhaqaalaha iyo ganacsiga, saamaynta qiime korodhku uu ku leeyahay hubinta cuntada qoysku waxay noqon doontaa mid ka xun kuwa kale maddaama fursadaha dakhligu ay koobnaan doonaan. Qiyaasta 670,000 ee ah dadka cusub ee ka barakacay Muqdisho iyo bulshooyinka ay martida u yihiin ee taageera dadka barakacay, qiime korodhka cuntadu saamayn weyn ayuu ku yeelan doonaa fursad-u-helidda iyo hubinta cuntada, taasoo halis ku haysa inay aad uga sii darto xaaladdooda bina-aadaminada ee sii xumaanaysaa.

Dhinaca wanaagsan, beeralayda haysta soosaar dalagga Deyrta ah oo dheeraad ahi waxay ka faa'iidaysan doonaan qiimaha wanaagsan marka ay iibiyaan midhahooda. Qiimaha dalagga dibedda laga keenaa uma eega inuu si weyn hoos ugu dhici doono (nabad la'aanta iyo qiime-dhaca Shilinka Soomaaliya dartood), baahida korodhay ee loo qabo dalagga gudaha ka soo baxa ee ka jabanina waxay keeni doontaa in qiimaha dalagga guduhu uu sarreeyo bilaha soo socda. FSAU aad ayay u kormeeri doontaa qiimaha cuntada toddobaadyada soo socda. Fursadaha dakhliga ee qoysaska saboolka ah ee deggan dhulka miyiga ah ee badi koonfurta Soomaaliya, oo ay ku jiraan gobollada Jubbooyinka, Shabeellooyinka, Baay, Bakool, iyo Gedo hore ayay u martay fursadaha shaqada beeraha ee sida jaridda dhirta aan loo baahnayn oo kordhay iyo heerarka mushahaarooyinka shaqada oo kor u kacay dartood. Awoodda wax iibsiga ee qoysaska fursada u haysta shaqo, in yar ayay hore u martay labadii bilood ee la soo dhaafay markii ay kordheen heerarka mushahaarooyinku. Tusaale ahaan, iswaydaarsiga ganacasiga (dalag/mushaahrada shaqada ee maalintii) ee gobollada Shabeellooyinku wuxuu kordhay 24%, Jubbooyinkana wuxuu kordhay 8% intii u dhaxaysay bishii 10aad iyo bishii 11aad ee 2007. Hase yeeshee, iswaydaarsiga ganacsiga ee bisha 11aad ee sannadkani 20%, 28% iyo 43% ayuu ka hooseeyaan kii bishii 11aad ee sannadkii 2006 Shabeellooyinka, Jubbooyinka iyo dhulka hadhuudhka ugu badani uu ka baxo, siday u kale horreeyaan (Jaantus 5).


**Jaantus 3: Isbeddellada Qiimaha Hadhuudhka ee Hiiraan**




**Jaantus 4: Isbeddellada Qiimaha Bariiska ee Gobollada Dhexe**




**Jaantus 5: Isbeddellada Iswaydaarsiga Ganacsiga ee Heer Gobol: Dalag Lagu Beddelanyo Shaqo**




ayax

## AYAX FARABADAN OO SOO DUULAY BISHII 11AAD IYO BISHII 12AAD

Bishii 9aad ee 2007, ayax farabadan oo ka soo duulay Yaman, ayaa u guuray gobollada waqooyiga ee Sanaag iyo Bari oo markii dambena u guuray hawdka Nugaal iyo Mudug. Muddadan, ayaaxaasi ukun ayuu dhigay ciidda hab-nololeedka Cadduun (Khariidadda 5) ee waqooyiga Mudug, iyadoo uu ayax badani u guuray Itoobiya oo uu markaas dhigay ukun gobolka Ogaadeen. Kuwo kale waxay u guureen gobollada Galgaduud (degmada Dhuusamareeb) iyo Hiiraan (degmada Buulo Burti).

Khariidadda 5: Ilaalada Ayaxa




Warbixinaha ka yimi waqooyi-bari bishii 11aad waxay muujinayaan in kooxo ayax ahi ay weli joogeen hawdka iyo Sool. Ayaxaasi waxa la soo sheegay inuu ku fidayay dhinaca Hawdka xoola-dhaqatada ee Gaalkacayo iyo Goldogob ee gobolka Mudug iyo weliba degmooyinka Burtiinle iyo Garoowe ee gobolka Nugaal oo ay waxyeello u gaysanayaan daaqa.

Roobab ka day'ay horraantii bishii 11aad goobaha xoola-dhaqatada ee Cadduun ee gobollada dhexe ayaa keenay xaalado ay ukuntii ayaxu ku dillaacday waxana ay qaadan doontaa afar toddobaad inta ay ayaxaasi ku waynaayaan. Raxan badan oo ayaxa ayaa la filayaan inay samaysanto mar kale badhtamaha bisha 12aad ee '07.

Ayax ka soo guurlay koonfurta shishe ee Itoobiya ayaa tegay Bakool (degmada Ceel-barde) halkaas oo ay is kala qaybiyeen. Kooxi waxay tegtay degmada Tiyeglow ee gobolka Bakool markii dambena waxay uga sii gudubtay degmada Buur-Xakaba ee gobolka Baay, halkaas oo ay uga sii gudubtay degmada Wanla Weyn ee gobolka Shabeellada Hoose. Kooxdii labaad waxay u duushay degmooyinka Waajid iyo Raab-Dhuurre ee gobolka Bakool markaas kadibna waxay u gudubtay degmada Qansaxdheere ee gobolka Baay. Kuwo kalena waxay u duuleen degmooyinka Buurdhuubo, Garbahaarrey iyo Luuq, markaas kadibna waxay u gudbeen Belet-Xaawo ee gobolka Gedo halkaas oo ay ukun dhigeen.

Marka ukunta la dhigo, waxay oolli kartaa halkaas illaa roobabka dambe ay ka da'ayaan oo ay duruufuhu ku habboonaanayaan inay ukuntu dillaacdo. Waxa jira walaac laga qabo in ukunta uu ayaxu dhigay bisha 11aad ama 12aad ee 2007 ay dillaaci doonto marka ay roobabka xilliga Gugu da'aan, taasoo keenaysa in midhaha iyo daaqa ay waxyeello gaadho. Ayaxu wuxuu cuni karaa in la eeg raxanta isku darkooda (2 g) oo ah cagaar, laamo, ubax, jirrid, khudrad iyo iniinyo. Badi midhaha iyo dhirtu halis ayay ku jiraan. Falanqeeyeyaashа FSAU ee gudaha joogaa waxay aad u kormeeri doonaan ayaxaas iyo saamaynta uu ku leeyahay midhaha iyo daaqa.






*Kooxo ayax ah oo jooga Hab-nololeedka Hawd ee gobolka Nugaal, FSAU Bisha 11aad ee '07*

## XOOLAHA

***Xaaladaha Seeraha iyo Guuritaanka Xoolaha***

Gobollada waqooyiga xaaladaha seeruhu waxay u dhexeeyaan caadi iyo inay wanaagsanyihiin roobabkii Guga/Karanta oo fiicnaa (waqooyi-galbeed) iyo roobabkii Deyrta oo wanaagsanaa dartood. Hase yeeshee, waxa ka reebban goobo ka tirsan bariga Nugaal (Garoowe iyo Taalex), bariga Hawdka Eyl, galbeedka Sool-Sanaag (Ceel-Afweyn iyo Ceerigaabo) iyo xoola-dhaqatada Cadduun ee koonfurta Jarriban. Gobolka Sanaag roobabku may buuxin berkadaha, ceelasha waaweyn ee ay ka adeegsadaan dad badan oo xoola-dhaqato ahina si fiican uma shaqaynayaan. Maddaama goobahaasi ay ka da'aan roobabka loo yaqaan Xays bisha 12aad, sida ay u da'een roobabkaasi muhiim ayay noqon doontaa aad ayaana loo kormeeri doonaa. Guuritaanka xoolaha ee waqooyigu guud ahaan waa caadi, hase yeeshee, waxa jira goobo ka reebban sidan, waxana la soo sheegay in laga guuray degmada Balliweyn ee gobolka Togdheer loona tallaabay soohdinta dhinca Itoobiya iyo in laga guuray bariga sanaag oo loo guuray Ufeyn ee gobolka Bari (Khariidadda 6).

**Khariidadda 6: Soomaaliya: Xoolaha oo Hore u Guuray Deyrta '07/08**




Xaaladaha seeraha ee badi goobaha xoola-dhaqatada ee Hiiraan, waqooyiga Galgaduud, iyo koonfurta Mudug way liitaan waxana ay ku wadi doonaan inay ka sii daraan xilliga Jiilaalka ee dheer roobabka Deyrta oo caadi ka hooseeya oo ay ka horreeyaan roobabkii Guga 2007 ee liitay dartood. Biyhu aad ayay u koobanyihiin badi gobollada dhexe, berkadaha oo ah qaabka ugu weyn ee ay goobahaasi biyaha ka helaanna dib umay buuxsamin roobabkii Deyrta kadib.

Sidaas darteed dhowr goobood, berkaduhu horeba way u madheen ama degdeg ayaa loo dhamaynayaa oo ma gaadhi doonaan xilliga Jiilaalka ee dheer. Goobo badan biyo la'aan ayaa horeba uga jirtay taniyo billowgii bishii 9aad, xoola dhaqataduna waxay ku tiirsanyihiin biya-dhaamis. Degmada Hobyo iyo dhulka xeebaha ah roobabkii Deyrtii way liiteen, dib u soo cusboonaysiintii daaqana waxa mijaxaabiyey iyadoo aad loo daaqay kadib markii xoolo badani ay isugu uruuray gobolkaas. Guuritaanka xoolaha rabay inay ka guuraan waqooyiga Galgaduud waxa xaddidday nabad la'aanta, sidaas darteed xaaladaha jidhka xooluhu waxay halis ugu jiraan inay sii xumaadaan. Gobollada Shabeellooyinka waxa la soo sheegay in daaqu uu yaryahay dhammaan xeebaha gobolladaas taasoo keentay in xooluhu si aan caadi ahayn ay ugu hayaameen goobaha ka daaqa wanaagsan ee degmooyinka Wanla Weyn, Jowhar, Balcad iyo Afgooye. Hase yeeshee daaqu wuu fiicnaaday goobaha u dhaxeeya daanta galbeed ee Webi Shabeelle iyo gobolka Baay, sababtoo ah roobabkii Deyrta ayaa wanaagsanaa oo dib u buuxiyey biya galeennada. Daaqa, guuritaanka xoolaha iyo xaaladaha biyaha ee qaybo badan oo ka tirsan gobollada koonfurtu waxa la sheegay inay caadi yihiin. Daadad dhowaan ka dhacay degmada Afgooye waxay saameeyeen goobaha daaqa qaarkood oo waxay ku khasbeen xooluhu inay ku ekaadeen dhulka xeebaha iyo webiyada.

***Xaaladaha Jidhka yo Dhalmada Xoolaha***

Guud ahaan, xaaladaha jidhka xoolaha ee gobollada koonfurtu waxa weeye caadi ama way wanaagsanyihiin, taasoo ka muuqata qiimaha xoolaha iyo iswaydaarsiga ganacsiga ee sarreeya (xoolaha lagu beddelanayo dalag). Dhalmada lo'da iyo adhigu waa dhexdhexaad, dhalmada geeluna way billaabantay waanay socon doontaa, iyadoo la filayo inay noqon doonto heerar dhexe iyo sare, illaa bisha 1aad ee 2008. Soosaarka caanuhu aad ayuu u kordhay, taasoo hore u marisay helitaanka iyo fursad-u-helidda caanaha maddaama qiimuhu uu hoos u dhacay. Guu dahaan, soosaarka caanuhu wuu kordhay gobollada Jubbooyinka, Baay/Bakool iyo Shabeellada Dhexe, waayo heerarka dhalmada ee dhammaan noocyada xooluhu way sarraysaa, hase yeeshee gobolka Shabeellada Dhexe dhalmada dhammaan xooluhu way hoosaysaa ama waa dhexdhexaad.

Xaaladaha jidhka ee dhammaan noocyada xoolaha ee waqooyiga gobolka Galgaduud iyo koonfurta Mudug way sii xumaanayaan, laakiin goobaha kale ee gobollada dhexe xaaladaha jidhka xooluhu waa caadi ama way wanaagsanyihiin. Roobabkii Deyrta ee caadiga ka hooseeyey iyo dib soo cusboonaysiinta daaqa oo aad u hoosaysaa waxay saamayn xun ku yeelan doonaan xaaladaha jidhka xoolaha bilaha Jiilaalka ee adag. Gobollada waqooyiga, xaaladaha jidhka xooluhu waxay isugu jiraan inay wanaagsanyihiin ama caadi yihiin, tirada xooluhuna way korodhay xilliyadii wanaagsanaa dartood. Qiyaastii 80% haluhu waxay rimeen Deyrtii 2006/7, waxana la filayaa inay dhalaan dhammaadka bisha 12aad ee 2007 illaa billowga bisha 1aad ee 2008. Helitaanka caanaha geelu aad ayuu u kordhay heerarka dhalmada geela ee sii kordhaya dartood. Mana jiraan cudurro dillaacay oo la soo sheegay, hase yeeshee oof-wareen xun oo ku dhaca riyaha ayaa lagu arkay dhammaan gobollada waqooyi-galbeed, cudurkaas oo keenaya inay dhiciyaan iyo inay tin xumaadaan.

**Qiimaha Xoolaha**


Gobollada koonfurta qiimaha dhammaan noocyada xooluhu aad ayuu u kordhay sannadkan xaaladaha jidhka, dhalmada iyo soosaarka xoolaha oo wanaagsan dartood. tuusale ahaan bishii 11aad ee 2007, qiimaha lo'du wuxuu kacay 217% Jubbooyinka, 153% Shabeellooyinka iyo 184% dhulka hadhuudhka/meseggada ugu badan laga beero marka loo eego bishii 11aad ee sannadkii 2006. Qiimaha lo'da ee goobahaasi wuu sarreeyaa marka loo eego celceliska qiimaha ee 5ta sano (Warbixinta Suuyqda ee FSAU ee bisii 12aad ee 2007). Gobollada dhexe iyo waqooyi-bari,

qiimaha xooluhu wuxuu ku waday inuu kacayay taniyo Gugii 2006. Marka loo eego bishii 11aad ee 2006, qiimaha rida dhoofintu wuxuu kordhay 115% gobollada dhexe iyo 122% gobollada waqooyi-bari. Laakiin gobollada waqooyi-galbeed qiimaha rida dhoofintu wuxuu hoos u dhacay 11%.


Dhammaan gobollada dhexe, waqooyi-bari iyo waqooyi-galbeed, marka la eego celceliska qiimaha ee 5ta sano, qiimaha rida dhoofintu wuxuu kordhay 119%, 144% iyo 148%, siday u kala horreeyaan. Inkasta oo qiimaha xooluhu uu sarreeyo haddana awoodda wax iibsiga ee xoola-dhaqatada ama iswaydaarsigooda ganacsiga ee ka dhexeeya ri iyo dalag ee dhammaan gobolladu wuxuu muujinaya hoos u dhac, qiimaha dalagga ah oo aad u kordhay dartiis. Gobollada koonfurta, iswaydaarsiga ganacsiga ee riyaha dhoofinta oo lagu beddelanyo dalag hoos ayuu u dhacay bishii 11aad ee 2006 illaa bisha 11aad ee 2007, hoos u dhacaas oo ka dhigan 31% (155 kg), gobollada Shabeellooyinka, 28% (140 kg) dhulka hadhuudhka ugu badan laga beero, iyo 14% (147 kg) gobollada Jubbooyinka (Jaantus 1). Marka la barber dhigo celceliska qiimaha ee 5ta sano ee bisha 11aad, iswaydaarsiga ganacsigu wuxuu hooseeyaa 23% gobollada Shabeellooyinka iyo 14% dhulka hadhuudhka ugu badan laga beero, laakiin gobollada Jubbooyinka wuxuu kor u kacay 3%. Gobollada dhexe, waqooyi-bari iyo waqooyi-galbeed, iswaydaarsiga ganacsiga ee ka dhexeeya rida dibaaxa/dhaqashada ah iyo bariisku wuxuu hoos u dhacay 45%, 46% iyo 29% marka loo eego bishii 11aad ee 2006, siday u kala horreeyaan. Isbeddelladan iswadaarsiga ganacsigu wuxuu la mid yahay ka celceliska qiimaha ee 5ta sano ee bisha 11aad.

Dhoofinta xoolaha nool ee laga diiwaangeliyey dekedaha Boosaaso iyo Berbera muddo shan bilood ah (Bishii 7aad illaa bishii 11aad ee 2007), wadartoodu waxa weeye 1,712,696 oo neef, taasoo 1,597,649 oo neef ay yihiin adhi, 98,611 neef ay yihiin lo', 16,436 oo neefna ay yihiin geel. Tani waxay u dhigantaa inay kordheen 30% marka loo eego isla muddadan ee sannadkii la soo dhaafay. Marka laga reebo sayladda hilibka xoolaha la dhoofiyo lagu qalo ee Burco, sayladaha kale ee hilibka xoolaha la dhoofiyo waa la xidhay nabad la'aan darteed taniyo bishii 1aad ee sannadkan 200, sidaas darteed lagama dhoofiyo hilib la qaboojiyey. Sayladda hilibka la dhoofiyo ee Burco waxa laga dhoofiyey 35,128 oo neef hilibkoodii bishii 7aad illaa bishii 11aad - taasoo ka dhigan hoos u dhac ah 48% marka loo eego isla muddadaas ee sannadkii la soo dhaafay, baahida loo qabo hilibkaas ee dawladaha Gacanka Carabta oo hoos u dhacday darteed kadib mamnuucidda sii socota ee lagu soo rogay dhoofinta xoola taniyo bishii 12aad ee sannadkii 2006.

**Jaantus 6: Isbeddellada Qiimaha Rida Dibaaxa ah ee Heer Gobol (ShSo/ShSl)**




**Jaantus 7: Isbeddellada Iswaydaarsiga Ganacsiga ee Heer Gobol: Dalag Lagu Beddelayo Ri**





## SUUQYADA


Shilinka Soomaaliya wuxuu ku wadaa inuu qiime dhacayo marka loo eego Doolarka Marykanka badi suuqyada waaweyn ee gobollada ee dhammaan dalka (Jaantus 8). Suuqa Bakaaraha ee Muqdisho, shilinku wuxuu hoos u dhacay 53%, isagoo ka soo dhacay ShSo14,160 bishii 1aad noqdayna 21,675 bishii 11aad. Sidoo kale, gobollada Shabeellooyinka guud ahaan shilinku wuxuu qiime dhacay 60 %, isagoo ka soo dhacay SoSh 13,520 bishii 1aad ee 2007 noqdayna 21,569 bishii 11aad. Gobollada dhexena shilinku wuxuu qiime dhacay 49%, isagoo ka soo dhacay ShSo 13,757 bishii 1aad noqdayna 20,467 bishii 11aad (Jaantus 8).

Hoos u dhacaas heerarka sarrifka lacagtu waa kii ugu sarreeyey ee lagu arkay Soomaaliya taniyo 2001/2, markii dhoofinta xooluhu ay sii socotay, soo gelidda Doolarka ee dalkuna aanay badnayn. Hase yeeshee Shilinka Soomaalilaand qiimihiisu wuxuu kordhay 9% isagoo ka kordhay ShSl 6,280 bishii 1aad noqdayna 5,738 bishii 11aad.

**Jaantus 8: Heerka Sarrifka Lacagta ee Bishii - ShSo iyo ShSl oo lagu beddelanyo Doolarka Maraykanka**





**Jaantus 9: Shabeellooyinka: Isbeddellada Qiimaha Badeecadda Dibedda Laga Keeno oo Loo Eegayo Heerka Sarrifka Lacagta**



Qiimaha badeecadda dibedda laga keeno ee sida bariiska, sonkorta iyo saliidda wax lagu karsado aad ayuu u kordhay sannadkii la soo dhaafay, iminkana wuxuu marayaa heerarkii ugu sarreeyey ee weliis la diiwaangeliyey dhammaan suuqyada, gaar ahaan gobollada Shabeellooyinka iyo kuwa dhexe. Suuqyada gobollada Shabeellooyinka, qiimaha bariiska dibedda laga keenaa bishii 11aad wuxuu ka badnaa labanlaab qiimihii bishii 1aad ee 2007, iyadoo qiimaha saliidda wax lagu karsadaana uu 92% ka sarreeyo siduu ahaa bishii 1aad ee 2007. Qiimaha sonkortu 22% ayuu ka sarreeyaa siduu ahaa isla muddadaas. Gobollada dhexe qiimaha bariiska iyo saliidda waxa lagu karsadaa wuxuu kordhay 107%, iyo 66%, siday u kala horreeyaan, taniyo bishii 1aad ee 2007. Qiime dhaca sii socda ee Shilinka Soomaaliya, karashka gaadiidka ee sii kordhaya iyo weliba qaska la xidhiidha colaadda ee ku yimi howlaha ganacsiga gudaha iyo dibed ka keenidda badeecaddu waxay ku wadi doonaan inay keenaan in qiimuhu uu sii kordho bilaha soo socda, taasoo si xun u saamayn doonta awoodda wax iibsiga iyo fursad-u-helidda cuntada ee qoysaska saboolka ah.


**Jaantus 10: Gobollada Dhexe: Isbeddellada Qiimaha Badeecadda Dibedda Laga Keeno oo loo eegyo Heerka Sarrifka Lacagta**




## NAFAQADA

**Gobollada dhexe iyo waqooyi-bari:** FSAU iyo hay'adaha ay isbahaystaan laba qiimayn oo nafaqada ah ayay ka sameeyeen gobollada dhexe iyo waqooyi-bari oo ku salaysan heer hab-nololeed 30kii bishii 10aad illaa 9kii bishii 11aad. Hab-nololeedyada xoola-dhaqatada ee Hawd iyo Cadduun waxay u dhexeeyaan Galgaduud illaa gobolka Mudug ee gobollada dhexe illaa koonfurta gobolka Nugaal ee waqooyi-bari (Khariidadda 7). Natiijooyinka hordhaca ah ee ka soo baxay qiimaynta nafaqadu waxay muujinayaan heerar nafaqa-darro xun oo halis ah, inkasta oo aanay suurtagalayn in is barbar dhigid toos ah la sameeyo marka la eego jiritaan la'aanta qiimayn nafaqo oo hore, haddana qiyaasaha hore ee ku salaysan xogta xarumaha caafimaadka, xogta baraha iyo qiimayn degdeg ah oo lagu sameeyey qiyaasta wareegga cududdu waxay muujinayaan inay dhici karto in xaaladdu ay xoogaa sii xumaatay. Natiijooyinku waa sidan soo socota:

**Khariidadda 7: Hab-nololeedyada Cadduun iyo Hawd**




**Hab-nololeedka Cadduun:** waxay warbixintu muujinaysaa **Heerka Nafaqa-darrada Guud** (GAM) oo ah **15.9% (12.8-18.9)** iyo **Heerka Nafaqa Darrada Xun** (SAM) oo ah **1.7%** (0.76-2.6).
**Hab-nololeedka Hawd:** waxay warbixintu muujinaysaa heerka **GAM** oo ah **17.2% (14.1-20.5)** iyo heerka **SAM** oo ah **1.3%** (0.55-2.1). Heerarka dhimashada ee dib loo eegay waxay muujinayaan heer la aqbali karo hab-nololeedka Cadduun iyadoo **Heerka Dhimashadu uu yahay 0.82** (0.38-1.25), hab-nololeedka Hawdna **Heerka Dhimashadu** waxa weeye **0.36** (0.14-0.58).

Falanqayn lagu sameeyey sababaha keenaya nafaqa-darradu waxay muujinaysaa in tiro ku dhow 50% carruurta la qiimeeyey ay sheegeen inay bukoodeen laba toddobaad ka hor qiimaynta, taasoo tira-koob ahaan xidhiidh weyn la leh carruurta ay nafaqa-darrada xumi hayso. Waxa intaas dheer, qiimaynta Cadduun marka la eego, in ka badan 20% qoysaska la qiimeeyey waxay ahaayeen dad ka soo barkacay Muqdisho bishii 2aad ee 2007, iyadoo 19% ay ahaayeen qoysaska dhulkaas deggan oo midkiiba uu martigeliyo ugu yaraan hal qoys oo soo barakacay. Saamaynta barakacu uu ku leeyahay hab-nololeedka Hawd way ka yartahay, iyadoo 5% ah dadka deggan dhulkaasi ee qiimaynta Hawd lagu sameeyey ay martigeliyaan dad soo barkacay, 4.2% qoysaska la qiimeeyeyna waxay ahaayeen qoysas cusub oo soo barakacay. Labaadaas hab-nololeedba qoysasku waxay sheegeen in culays dheeraad ah ay ku hayaan hantidooda dadka cusub ee soo barkacay, taasoo u eeg inay lug ku leedahay heerarka nafaqa-darrada halista ah ee jira. Ugu dambaystiina, roobabka caadiga ka hooseeyey ee da'ay iyo natiijada ka timi ee ah inuu yaraaday daaqu iyo in xuuluhu ay guureen oo ay markaas yaraatay fursad-u-helidda soosaarka xoolaha ee sida caana la siiyo carruurtu, waxa laga yaabaa inay saamayn xun ku leedahay xaaladda nafaqada. Si aad u heshid war dheeraad ah fadlan tixraac Warbixinta Bishii ee Nafaqada ee FSAU ee Bishii 10aad/11aad ee 2007.




*Xog Uruuriye qiyaasaya dhererka ilmo yar, Galgaduud '07*

**Gobolka Bakool:** Action Contre La Faim (ACF) waxay ka samaysay baadhitaan nafaqada ah magaalada **Wajid iyo goobaha ku hareeraysan** bishii 11aad ee 2007 natiijooyinka hordhaca ahina waxay muujinayaa in heerka GAM uu yahay **14.3%** (10.5-18.1), heerka SAMna uu yahay **0.8% (0.2-1.5).** Heerarkaasi ma muujinayaan isbeddel weyn marka loo eego baadhitaankii nafaqada ee ugu dambeeyey ee ay ACF samaysay bishii 2aad ee 2007, markaas oo warbixintu ay ay sheegtay in heerka GAM uu ahaa 15.6% (12.4-18.8), heerka SAMna uu ahaa 1.1% (0.2-2.0). Heerarka dhimashadu waxay ahaayeen **1.55** (0.44-2.66) carruurta 5 sano ka yar iyo **0.57** (0.24-0.9) wadarta

dadweynaha taasoo muujinaysa heerar ka hooseeya heerka gurmadka. Falanqayn tan ka faahfaahsan ayaa iminka socota, si aad u hesho war dheeraad ahna fadlan toos ula xidhiidh hay'adda ACF.

**Warbixinta Shuban Biyoodka: (WHO, Soomaalilaand):** kadib warbixino ku saabsan in tirada dhacdooyinka cudurka Shuban Biyoodku ay korodhay magaalada Berbera, Wasaaradda Caafimaadka iyo Shaqadu waxay abuurtay guddi howleed xakameeya fiditaanka cudurkaas. Indha indhayn lagu sameeyey diiwaannada cusbitaalka ee Berbera waxay shaaca ka qaadday in 537 oo qof uu cudurkaasi ku dhacay 8dii illaa 27kii bishii 10aad iyadoo uu hal qof u geeriyooday cudurkaas. Laga billaabo 29kii bishii 10aad, laba iyo soddon qof oo uu cudurkaasi ku dhacay ayaa la dhigay cusbitaalka degmada Gabiillay laakiin cidina umay dhiman cudurkaas. Howlaha dadaalka ah ee lagu xakamaynayo cudurkaasi way socdaan waxana ku jira tababarro cusboonaysiin ah oo la siinayo shaqaalaha caafimaadka oo ku saabsan sifaalaha cudurkaas iyo maamulkiisa iyo daawaynta goobaha biyaha laga helo.

**Jaantus 11: Dhacdooyinka Cudurka Shuban Biyoodka oo loo Qoondeeyey Da', Magaalada Berbera, Gobolka Saaxil ee Soomaalilaand, 8 -26 Bishii 10aad ee 2007**




**Qiimaynta Nafaqada ee socota:** Laga billaabo badhtamihii bishii 11aad illaa badhtamaha bisha 12aad FSAU iyo hay'adaha ay isbahaystaan waxay samaynayeen siddeed qiimaynood oo nafaqada ah oo ku salaysan heer hab-nololeed oo laga sameeyey: Gobolka Hiiraan (2), gobolka Baay (1), gobolka Bakool (2) iyo gobollada Jubbooyinka (3). Natiijooyinka waxa lagu soo bandhigi doonaa Warbixinta Bishii ee Nafaqada ee Bisha 12aad oo la daabici doono bisha 1aad ee sannadka 2008.



## FALANQAYNTA GOBOLLADA

**Gobollada Koonfurta**

**X**eebaha gobollada Shabeellooyinka, qaybo ka mid ah waqooyiga Bakool iyo goobo yar oo ka tirsan degmada Jamaame iyo gobollada Jubbooyinku waxay heleen roobab Deyrta ah oo liita. Gobollada kale ee beeralayda ah ee koonfurtu waxay heleen roobab fudud iyo kuwo dhexdhexaad ah, goobaha qaarna waxay heleen roobab culus. Badi aaladaha qiyaasta roobabka ee goobaha beeralayda ah ee gobollada Jubbooyinka, Gedo, Baay iyo Bakool waxay diiwaan gasheen roobab caadi ah.

Guud ahaan abuuritaanka midhaha ee koonfurta waxa loo arkaa inay caadi tahay gobollada Jubbooyinka, Shabeellooyinka, Baay, koonfurta Bakool iyo Gedo. Laakiin abuuritaanka midhaha ee xeebaha gobollada Shabeellooyinka waxa la soo sheegay inay aad u liidato. Sidoo kale, helitaanka fursadaha shaqada guud ahaan waa caadi gobollada koonfurta maddaama howlaha abuurka iyo jaridda dhirta aan loo baahnayni ay socdaan oo ay dakhli soo gelinayaan qoysaska saboolka ah. Goobaha beeruhu ay ku baxaan roobabka, badi beeralaydu waxay bilaabeen inay midho ku abuuraan intaanay billaabmin roobabka u horreeyaa. Abuurka midhaha roobabka ku baxana waxa loo arkaa inuu wanaagsanyahay gobollada Jubbooyinka, Shabeellooyinka, Baay iyo Gedo marka laga reebo goobo yar oo ka tirsan gobollada Shabeellada Hoose iyo Dhexe. Dhulka webiyada ee Shabeellada Hoose, qiimaha shiidaalka oo sarreeya iyo adeegyada waraabinta oo liitaa waxay keeneen in dhulka midhaha lagu beeray ay yaryihiin. Bishii 11aad, daadad goobaha qaar ku kooban oo ka dhacay gobollada Shabeellooyinku waxay waxyeelleeyeen daaqa iyo dhul beereed, iyo weliba waddada u dhaxaysa Jowhar iyo Muqdisho, taasoo keentay inay qasmeen suuqyadu. Daadad ku kooban goobaha qaar ayaa baabi'iyey dhul midho laga beeray oo ka tirsan degmooyinka Afgooye iyo Wanla Weyn oo isla markaana waxyeello gaadhsiiyey waddada laamiga ah ee isku xidha Muqdisho iyo Baydhaba.

Shabeellada Hoose, dalagga gudaha laga soo saaro iyo goobaha qaar cuntada gargaarka ah ayaa wax ka taray helitaanka dalagga ee suuqyada dhammaan gobolka Shabeellada Hoose. Hase yeeshee, Shabeellada dhexe helitaanka dalagga ee suuqyadu wuu hooseeyaa badi suuqyada waaweyn. Qiimaha gallaydu aad ayuu u kordhay sagaalkii bilood ee u dambeeyey dhulka ugu badan ee gallayda iyo hadhuudhka soo saara ee koonfurta (eeg Qaybta Beeraha). Qiimaha gallayda ee gobollada Jubbooyinku bishii 11aad ee 2007 wuxuu ka korreeyey 75% siduu ahaa bishii 11aad ee 2006, 50 % ayaanuu sarreeyey marka loo eego celceliska qiimaha ee 5ta sano. Gobollada Shabeellooyinka qiimaha gallaydu 99% ayuu ka sarreeyey siduu ahaa isla bishaas ee sannadkii hore, waxana uu ka sarreeyey 88% celceliska qiimaha ee 5ta sano. Degmada Baydhaba, qiimaha hadhuudhku bishii 11aad 29% ayuu ka sarreeyey siduu ahaa bishii 10aad ee 2007, baahida dalagga gudaha ay u qabaan gobollada la deriska ah oo korodhay iyo dalaggii xilligii Guga 2007 oo aan lagu guulaysan dartood.

Daaqa iyo biyaha badi gobollada koonfurta waa la helaa, marka laga reebo xeebaha gobollada Shabeellooyinka iyo waqooyiga gobolka Bakool. Guurtaan hore oo xoolaha ah oo goobaha qaar ku kooban ayaa ka dhacay gobollada Shabeellooyinka, halkaas oo xuuluhu ay ka guureen daanta bari ee webiga oo ay u hayaameen daanta galbeed. Gobolka Bakool, guurtaanka xooluhu wuxuu ku koobnaa gobolkaas gudihiisa. Guud ahaan xaaladaha jidhka xoolaha ee gobollada koonfurtu waa caadi ama way wanaagsanyihiin, taasoo ka

muuqata qiimaha xoolaha iyo iswaydaarsiga ganacsiga (xoolo lagu beddalanyo dalag) oo sarreeya. Dhalmada lo'da iyo adhiguba waa dhexdhexaad, dhalmada geeluna way billaabantahay waanay sii socon doontaa illaa bisha 1aad ee 2008, iyadoo la filayo inay noqon doonto dhexdhexaad ama sarrayn doonto. Soosaarka caanuhu si weyn ayuu u kordhay, taasoo hore u marisay helitaanka iyo fursad-u-helidda maddaama uu qiimaha caanuhu hoos u dhacay.

Inkasta oo uu kordhay heerka mushahaarada maalintii ee shaqada xirfad-laaweyaasha ee gobollada Shabeellooyinku, iswaydarsiga ganacsiga ee ka dhexeeya shaqada iyo dalagga ee bishii 11aad weli 20% ayuu ka hooseeyaa celceliska 5ta sano ee bisha 11aad sababtoo ah qiimaha dhammaan dalagga oo sarreeya.

**Gobollada dhexe**

Sida ay u da'een roobabka Deyrta ee gobollada dhexe way ka hooseeyeen celceliska muddada dheer marka la eego inta ay la eegayaan iyo muddada ay da'ayeen labadaba. Roobabka da'ay bishii 9aad iyo bishii 10aad qayb ahaan waxay hore u mariyeen xaaladaha biyaha iyo daaqa ee degmooyinka koonfurta ee gobollada Galgaduud iyo Hiiraan, hase yeeshee, muddo dheer oo aany roobab di'in oo ahayd badhtamihii bishii 10aad illaa bishii 11aad ayaa dib u celiyey xaaladdaas. Isku darka roobabka xilliga Deyrta ee da'ayay illaa bishii 11aad wuxuu u dhexeeyey 0 iyo 50mm. Marka loo eego celceliska muddada dheer, badi goobahaasi waxay heleen roobab ka yar boqolkiiba 40 sida caadiga ah. Xaaladaha hadda ee dhirta iyo biyhu aad ayay uga hooseeyaan caadi, xaaladaha daaqa gaar ahaan ka lo'du, aad ayuu u liitaa siiba qaybaha waqooyiga ee gobollada Galgaduud iyo Hiiraan iyo dhulka xeebaha ah ee dhammaan gobollada dhexe.

Gobolka Hiiraan, lo' dhaqatada Beled Weyne iyo Buulo Burti waxay u hayaameen koonfurta Jalalaqsi waxana laga yaabaa inay geli doonaan gobollada Shabeellooyinka. Waxa intaas dheer, beera-iyo-xoola-dhaqatadu waxay ku wadaan inay quudinayaan lo'dooda, sidaas darteed waxa ku soo baxay kharash dheeraad ah maddaama ay cawska iibsadaan. Gobolka Galgaduud, biyuhu aad ayay u yaryihiin koofurta badi degmooyinka Xarardheere, Ceeldheer iyo Ceelbuur, berkadaha iyo biya-galeennada dabiiciga ahina waxay u eegyihiin inay madhan doonaan dabayaaqada bisha 12aad. Guuritaanka gudaha gobolkaas ah oo ay xooluhu ku raadinayaan daaq iyo biyo wuu sarreeyaa, laakiin guuritaanka dibedda gobolkaasi wuu koobanyahay colaadda ka dhexaysa bulshooyinka ay deriska yihiin darteed. Waqooyiga Galgaduud iyo koonfurta Mudug, biya-dhaamis ayaa ka socda, guuritaan badan oo u jeeda dhinaca waqooyiga Mudug iyo weliba Itoobiyana wuu socdaa.

Guud ahaan xaaladaha jidhka ee dhammaan noocyada xoolaha ee waqooyiga Galgaduud way sii xumaanayaan, laakiin gobollada dhexe ee kale weli waa caadi ama way wanaagsanyhiin. Hase yeeshee, roobabkii Deyrta ee caadiga ka hooseeyey iyo dib u soo cusboonaysiinta daaqa oo aad u hoosaysay waxay saamayn xun ku yeelan doonaan xaaladaha jidhka xoolaha bilaha ka horreeya roobabka dambe ee Guga 2008. Ma jiraan warar ku saabsan cudurro xoolaha ku dhacay. Qiimaha dalagga ee gobolka Hiiran wuxuu gaadhay heerkii ugu sarreeyey ee la diiwaangeliyey, hadhuudhka caddina iminka wuxuu marayaa 5,640 ShSo/kg. Dalagga ka yimaadda degmada Goday ee Itoobaya aad ayuu hoos ugu dhacay sababtoo ah dalagga oo aan lagu guulaysan iyo qiime dhaca Shilinka Soomaaliya marka loo eego Doolarka Maraykanka. Qiimaha hadhuudhku wuxuu kordhay 88% bishii 7aad illaa bishii 11aad ee 2007. Qiimaha gallayda cad (oo badi laga keeno Itoobiya) wuxuu kordhay 22% bishii 7aad illaa bishii 11aad (isagoo ka kacay ShSo 4,250 noqdayna ShSo 5,200/Kg), iminkana 100% ayuu ka sarreeyaa siduu ahaa isla muddadaas ee sannadkii hore. Qiimaha dalagga ee labanlaabmay wuxuu tilmaan ka bixinayaa in rajada laga qabo soosaarka dalagga Deyrtu uu liito dhulka beera-iyo-xoola-dhaqatada iyo dhulka webiyada ee gobolkaas. Gobollada dhexe, gaar ahaan degmooyinka Dhuusamareeb iyo Gaalkacayo, qiimaha bariisku wuxuu kordhay 60% iyo 20% intii u dhaxaysay bishii 7aad iyo bishii 11aad.

Iswaydaarsiga ganacsiga (ri lagu beddelanyo dalag) iminka ma wanaagsana gobolka Hiiraan, waxana uu hoos u dhacay 15% bishii 7aad illaa bishii 11aad ee 2007 suuqa Beled Weyne (isagoo hoos uga soo dhacay 86 noqdayna 73 kg/neefkii). Gobollada dhexe, iswaydaarsiga ganacsiga ee Gaalkacayo wuxuu hoos u dhacay 47% isla muddadaas (isagoo hoos uga soo dhacay 76.kg/neefkii bishii 11aad ee 2006 noqdayna 41kg/neefkii bishii 11aad ee 2007). Arrintan waxa u sabab ah qiimaha bariiska oo labanlaabmay oo ka kacay ShSo 7,000 noqdayna ShSo 14,000/kg. Bulshooyinka dhulka webiyada ee Hiiraan fursadaha shaqada beeruhu way koobanyihiin roobabkii Deyrta oo aan fiicnayn, abuuritaanka midhaha oo liitay iyo beeralayda oo aan diyaar u ahayn inay jaraan dhirta aan loo baahanyn dartood. Arrimahani waxay dhimeen iswaydaarsiga ganacsiga ee ka dhexeeye shaqada iyo dalagga oo hoos uga soo dhacay 18 kg bishii 11aad ee 2006 noqodayna 10 kg bishii 11aad ee 2007.

**Gobollada Waqooyiga**

Sida ay u da'een roobabka Deyrta 2007 way isku jirtay gobollada waqooyiga marka la eego inta ay la eegaayeen, dulka ay gaadheen iyo muddada ay da'ayeen roobabkaasi. Sida uu muujinayo sawirka dayax-gacmeedka oo ay taageerayaan warbixinaha guduhu, roobab Karan ah oo caadi ka sarreeyaa ayaa ka da'ay dhammaan gobollada Galbeed, Awdal iyo Togdheer. Gobollada Sool iyo Sanaag, roobab caadi ah ayaa ka da'ay dhammaadkii bishii 9aad illaa bishii 11aad, marka laga reebo galbeedka Sool-Sanaag (Ceel-afweyn iyo Ceerigaabo). Gobolka Sanaag berkaduhu may buuxsamin, ceelasha waaweyn ee ay ka adeegsadaan badi dadka badan ee xoola-dhaqatada ahina si fiican uma shaqaynayaan, kuwaas oo ay ku jiraan Awr-boogays, Baragaha-qool, Ceel-Buux, Qabri-Huluul, Ceel-Gaal, Kalowle iyo Karuure oo dhammaan u baahan dib-u-habayn.

Xeebta Deex ee degmada Iskushuban ee gobollada waqooyi-bari, Hawdka Eyl iyo degmooyinka Garoowe io Taleex ee bariga Nugaal roobabku aad ayay u hooseeyeen marka la eego inta ay la'eegaayeen iyo dhulka ay gaadheen labadaba, iyadoo roobab caadi ah ama ka sarreeyaa ay ka da'een dhulka Hawdka, Sool iyo badhtamaha Nugaal. Warbixinaha ka imanaya guduhu waxa kale oo ay muujinayaan in gobollada Awdal iyo Galbeed ay heleen roobab wakhtiga ay da'ayeen uu dheeraa oo wanaagsan oo ah Guga/Karanta bishii 7aad illaa bishii 9aad, qaybo ka mid ah waqooyi-barina waxay heleen roobab si wanaagsan u da'ay bishii 9aad iyo horraantii bishii 10aad.

falanqaynta gobollada

falanqaynta gobollada

Guuritaanka xooluhu guud ahaan wuxuu ka jiraa gobolladaas dhexdooda, hase yeeshee waxa la soo sheegay inuu jiro guuritaan laga hayaamay degmada Balliweyn ee gobolka Togdheer oo loo tallaabay soohdinta dhinaca Itoobiya, iyo guuritaan lagaga hayaamay bariga Sanaag oo lagu tegay degmada Ufeyn ee gobolka Bari. Waxa jira saamayn muuqata oo ay roobabku ku yeesheen dib u soo cusboonaysiinta daaqa iyo dhirta, helitaanka biyaha oo hore u maray iyo xaaladaha jidhka dhammaan noocyada xoolaha oo wanaagsanaaday dhammaan qaybaha gobollada waqooyiga, inkastoo roobab caadi ka hooseeyaa ay ka da'een qaybo ka mid ah gobollada Sanaag iyo Nugaal. Marka la eego roobabka wanaagsan ee ka da'ay gobollada waqooyi-galbeed, dhul ay qiyaastiisu tahay 37,562 oo hektar ayaa laga gooyey hadhuudh iyo gallay, kaasoo 85% uu yahay hadhuudh 15% uu yahay gallay. Illaa 70% dhulka midhaha laga gurtay waxa weeye degmada Gabiillay, inta hadhayna waxa laga gooyey degmooyinka Baki/Borame, Hargeysa iyo gobolka Togdheer. Qiyaasta soosaarka midhuhu waa 26,744MT (22,722MT oo hadhuudh ah iyo 4,022MT gallay ah). Tani waxay ka sarraysaa 7% soosaarkii dalagga Guga/Karanta ee 2006 (25,020MT), waxana ay ka sarraysaa 49% Celceliska Dagaalka Kadib (1998-2006) iyo 26% celceliska 5ta sano ah (2002-2006).

Isku darka xoolaha laga dhoofiyey dekedaha Berbera iyo Boosaaso way sii kordhaysay shantii bilood ee u dambeeyey (bishii 7aad - 11aad), taasoo ka jawaab celinaysa baahida sare ee Rabadaantii iyo xilliga Xajka ka timi dawladaha Gacanka Carabta. Wadarta tirada xoolaha laga dhoofiyey dekedaha Berbera iyo Boosaaso aad ayay u korodhay, iyadoo ka kacday 222,074 oo neef bishii 7aad ee 2007 noqotayna 714,624 oo neef bishii 11aad ee 2007. Wadarta xoolaha laga dhoofiyey dekedda Berbera bishii 11aad ee 2007 waxay ahayd 327,819 oo neef iyadoo korodhay 170% marka loo eego bishii 10aad ee 2007 tiradana korodhay waxay ka dhigantahay 257% marka loo eego isla wakhtigan sannadkii hore.

Bishii 11aad tirada xoolaha laga dhoofiyey dekedda Boosaaso waxay ahayd tii ugu sarraysay ee weligeed la diiwaangeliyey (386,725 oo neef) oo waxay korodhay 228% marka loo eego bishii 10aad ee 2007, waxana ay tani ka sarraysaa 162% xoolihii la dhoofiyey isla bishaas ee sannadkii hore. Sayladda xoolaha lagu qalo ee Burco hilibka laga dhoofiyey wuxuu ahaa 12,000 oo neef bishii 11aad, taasoo 129% ka sarraysay tiradii bishii 10aad laga dhoofiyey (5,235 oo neef hilibkoodii) waxana ay ka hoosaysaa 23% tiradii laga dhoofiyey isla bishaas sannadkii hore.

Gobollada waqooyi-galbeed, celceliska qiimaha riyaha dibaxaa/dhaqashada ahi wuxuu ka kordhay ShSl 182,625 bishii 10aad waxana uu noqday ShSl 205,375 bishii 11aad isagoo ka hooseeya 11% siduu ahaa bishii 11aad ee sannadkii 2006. Qiimaha rida dibaaxa/dhaqashada ahi wuxuu ka yare kordhay ShSl 148,875 bishii 10aad isagoo gaadhay ShSl 163,125 bishii 11aad. Iswaydaarsiga ganacsiga (bariis lagu beddelanayo ri dibaax ah) wuu yare kacay intii u dhaxaysay bishii 10aad illaa 11aad laakiin 29% ayuu hooseeyaa marka loo eego siduu ahaa bishii 11aad ee sannadkii 2006. Gobollada waqooyi-bari, qiimaha rida dibaaxa ahi wuxuu hoos u dhacay 2% bishii 11aad (ShSo 600,938) marka loo eego bishii 10aad ee 2007 laakiin 22% ayuu sarreeyaa marka loo eego isla bishan ee sannadkii hore. Iswaydaarsiga ganacsiga ee ka dhexeeya rida dibaaxa ah iyo bariiska dibedda laga keeno ee bishii 11aad wuxuu hoos u dhacay 9% marka loo eego bishii 10aad ee 2007.

**Warbixinaha iyo war saxaafadeedka dhowaan soo baxay ama soo socda**

*Warbixinta Xogta Suuqyada ee FSAU/FEWSNET ee Bisha 12aad ee 2007*
*Warbixinta Xogta Cimilada ee FSAU/FEWSNET ee Bisha 12aad ee 2007*
*Warbixinta Bishii ee Nafaqada ee Bisha 10aad/11aad ee 2007*
*War Saxaafadeedka FSAU ee 19kii Bishii 11aad ee 2007*
*Taxanaha Farsamada ee FSAU ee Falaqaynta Guga '07Kadib, 21ka Bisha 9aad ee 2007*

***XUSID:** Warbixinaha iyo war saxaafadeedka kor ku xusan waxa laga helayaa websaytka FSAU: www.fsausomali.org*

Technical & Managerial Support

European Commision USAID Sida FEWS NET care unicef Save the Children UK

Funding Agencies

Technical Partners